

Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta Gobolka King (HMIS)

OGGOLAANSHAHA MACMILKA LOOGU TALOGALAY ARUURINTA XOGTA IYO SIIDEYNTA MACLUUMAADKA

Muxuu yahay Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta?

Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta waa nidaam xog midkaas oo kaydiya macluumaadka kusaabsan adeegaha guri la'aanta. Bitfocus, Inc. ayaa u maareysa Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta Gobolka King. Ujeeddada Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta waa in lagu wanaajiyo adeegaha lagu taageero dadka guri la'aanta ah si ay guri u helaan, oona si fiican ugu helaan adeegahan, halka laga soo baxayo shuruudaha maalgeliyayaasha sida Waaxda Mareykanka ee Guryaynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD).

Maxay tahay ujeeddada foomkan?

Foomkan, waxaad ku bixin kartaa oggolaansho loogu haysto macluumaadka la aruuriyay ee adiga kugu saabsan oona loola wadaago Wakaaladaha Iskaashiga ah kuwaas oo ku caawinaya Gobolka King in uu bixiyo guryayn iyo adeego. Liiska hadda ah ee Wakaaladaha Iskaashiga lala yahay waa <http://kingcounty.hmis.cc/participating-agencies/>

HADDII AAN SIXIIXO FOOMKAN, WAXAAN U OGGOLAANAYAA Gobolka King iyo Bitfocus in ay la wadaagaan macluumaadka Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta Wakaaladaha Iskaashiga ah. Macluumaadka Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta ee lala wadaago wakaaladaha waxaa loo isticmaali doonaa in la igu caawiyo in aan helo guri iyo adeego. Waxaa sidoo kale loo adeegsan doonaa sidii si wanaagsan loogu fahmi lahaa ee loo hormarin lahaa guryaynta iyo barnaamijyada adeega darbi jifka. Anigu waan fahansanahay in Wakaaladaha Iskaashiga ahi ay isbedeli karaan muddo kadib.

Macluumaadka la aruurinayo oona lawadaagayo waxaa kamid ah:

- Magaca, maalinta dhallashada, nooca qofka, jinsiyada, qowmiyada qofka, lambarka dammaanada bulshada, lambarka teleefoonka, cinwaanka
- Caafimaadka aasaasiga ah, caafimaadka maskaxda, isticmaalka daroogo, iyo macluumaadka nolol maalmeedka ah
- Macluumaadka Guriga
- Icticmaalka adeegaha dhibaataada, isbitaalada iyo xabsi
- Shaqaalaynta, dakhliga, macluumaadka dheefaha iyo caymiska
- Adeegaha laga bixiyo dhinaca Wakaaladaha Iskaashiga
- Natijoooyinka qiimeynta
- Sawirkayga ama wax kale oo u dhigma (haddii lagu daro)

HADDII AAN SIXIIXO FOOMKAN, ANIGU WAAN FAHANSANAHAY IN:

- Gobolka King, Bitfocus iyo Wakaaladaha Iskaashiga ay ka dhigi doonaan macluumaadkayga Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta kuwo sir ah ayaga oo isticmaalaya siyaasado khusuusiyaad adag. Waxaan xaq u leeyahay in aan muraajaco kusameeyo siyaasadooda khusuusiyaadeed.

- Waxaa jira khatar yar oo ka imaan karta ammaan jabin, waxaana dhici karta in uu qof helo macluumaadkayga una isticmaalo si aan sax ahayn.
- Haddii aan qabbo su'aalooyin kusaabsan xuquuqahayga khusuusiyadeed, macluumaadkayga Macluumaadka Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta ah, ama waxaan ka wel-welsanahay in macluumaadkayga loo isticmaalo si khaldan, Waxaan kala xiriiri karaa maamulaha nidaamyada Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta lambarkan (206) 444-4001 x2.
- Waxaan heli karaa nuqul kusaabsan Oggolaanshahan iyo Warqada Macluumaadka Macamiilka
- Waan diidi karaa in aan sixiixo Oggolaanshahan. Haddii aan diido, Ma weyn doono wax kasta oo dheefaha ama adeegaha ah.
- Oggolaanshahan wuxuu dhici doonaa 7 sanno laga bilaabo hawshayda diiwaangelinta Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta ugu dambaysay.
- Waxaan ka noqon kartaa Oggolaanshahan wakhtiga aad doonto adiga oo warqad u diraya:

Bitfocus, Inc.

ATTN: King County HMIS

5940 S Rainbow Blvd Ste 400 #60866

Las Vegas, Nevada 89118-2507

- Ka noqoshadu waxay dhaqan geli doontaa marka ay nasoo gaadho, marka laga tago wixii hore loogu bixiyay Oggolaanshahan, kadib marka Hay'ada Wada Shaqayta La Leeyahay iyo Isku Duwaha Gelinta ee ay khusayso Dhamaan wakhtigeeda la wargeliyo si ayna ka noqoshadu u dhax galin daryeelka ama isku duwida adeega.
- Macluumaadkayga Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta waxaa lagala sii wadaagi karaa dhinaca Wakaaladaha Iskaashiga wakaalado kale si loogu sameeyo isku duwid daryeel, latalin, cunto, qalab caawimaad, iyo adeego kale.
- Macluumaadkayga Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta waxaa laga daalacan karaa dhinaca tifatirayayaal ama hanti dhowrayaal ama maalgeliyayaal kuwaas oo muraajaco kusameeya shaqada Wakaaladaha Iskaashiga, ay kujirto HUD, Waaxda Arimaha Halyayga hore, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, iyo Waaxda Gobolka Washington ee Ganacsiga.
- Macluumaadkayga HMIS waxaa loo adeegsan karaa qiimayn tayada adeegyada la bixiyay. Waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa wixii ujeedooyin daraasadeed ah taas oo waafaqsan yoolka iyo shaqada Degmada King.

MUHIIM AH: Ha gelinin macluumaadka shakhsi ahaaneed HMIS wixii macaamiil ah: 1) qaata adeegyada hay'adaha tacadiyada guriga dhaxdiisa; 2) wakhtigan baxsan ku jira ama khatar tacadi guri, tacadi xidhiidh, xad gudub galmo ama cid daba socoto; 3) hore ugu jiray barnaamij u baahan in la sheego xaalada HIV/AIDS (sida, HOPWA); ama 4) kayar 13 jir aan waalid ama koriye u jooga oo ogolaansha u bixiyaa aanu jirin si macluumaadka ilmahan yar loo geliyo HMIS.

Haddii mid kamid ah xaaladahan ay ku khuseyso, **HA OGGOLAANIN** in la aruuriyo macluumaadkaaga aqoonsiga shakhsiyeed.

MACLUUMAADKA MACMIILKA*

Magaca Macmiilka: _____

Taariikhda Dhalashada Macmiilka: _____

***Fadlan u isticmaal hal foom xubin walb oo reerka ah (waxaa ku jira mid ah hal foom canug walba).**

SIXIIXA:

Saxiixa Macmiilka ama Wakiilka U Sharciga Ogolyahay:

Taariikhda

QOR MAGACA:

Wakiilka U Sharciga Ogolyahay si loogu saxiixo macmiilka wiilka laga yahay:

- Waalidka - Masuulka Sharciga - Amarka Maxkamadda - Kuwa Kale: .

Waxaa Isticmaalka oo kaliya Haya'ada (si loo heyo galka haya'ada)

Macmiilka wuxuu doortay inuu ka baxo (Diidmada Ogolaanshaha) _____ (Shaqaalaha/Magaca Haya'adaha)

(Marqaatiga Haya'ada & Shaqaalaha)

Taariikhda